Cudurka Qoorgoys

Ka difaacidda carruurta cudurka qoorgoyska iyadoo la siinayo tallaalka MMR

Tirada carruurta qaadaya cudurka qoorgoyska ee waddanka UK waa halkii ugu sarraysay ee muddo toban sano ah. Si ilmo looga difaaco wuxuu u baahan yahay laba cabbir oo tallaalka MMR ah. Carruurta da' kastaba leh ee lumiyay tallaalka MMR waxay wali heli karaan tallaalka si looga difaaco ku dhicitaanka cudurka qoorgoyska.

Sababtee ayaa cudurka qoorgoysku kor ugu kacay?

Bartamihii sannadihii 1990-naadkii waxaa lagu joojiyay fiditaanka cudurka qoorgyaska iyadoo la qaatay tallaal badab oo MMR ah. Laga bilaabo 1998 cabashada tiro yar oo cilmi baarayaal ah ee ku saabsan ammaanka tallaalka ayaa wuxuu ka helay eegid badan jaraa'idka iyo saxaafadda. In kasta oo cabashooyinkaas laga dhigay gebi ahaanba kuwa wax kama jiraan ah, carruurta waalidiin badan ee go'aansaday diidmada MMR waqtigaas waa kuwa aan hadda wali la tallaalin. Qaadashada tallaalka ee carruurta aan wali da' dugsi gaarin waxay hadda ku socotaa heerarkii ugu sarreeyay ee bartamihii 1990-naadkii. Hase yeeshee, waxaa lagu qiyaasay in ku dhawaad 80,000 carruurta dugisyada ee gobolka Wales kuwaasoo lumiyay mid ama labada cabbirba ee MMR. Waa kuwa ka mid ah kooxaha da'da wayn ee fidiya cudurka qoorgoyska si fudud.

Cudurka qoorgoysku ma khatarbaa?

Haa, cudurka qoorgoysku khatar ayuu noqon karaa waxaana sababa fayrus aad u faafa. Ku dhawaad qof kasta qaada qoorgayska waa la xanuunsan karaa si xumad sare iyo cuncun leh. Celcelis ahaan, ilmo qaba cudurka qoorgoyska wuxuu ku qaadan karaa ilaa shan maalmood sariir oolid isagoo ka maqnaan kara dugsiga ku dhawaad toban maalmood. Dadka waawayn waxaa laga yaabaa inay xanuunsanaadaan in ka badan.

Qiyaastii hal ka mid ah 15 qof kasta ee qaba cudurka qoorgoyska wuxuu la iman karaa xannuuno aad u daran. Kuwan waxaa ka mid ah shuban, dhaga xanuun, xabad xanuun, fits, encephalitis (hurid/aruurid maskaxda), iyo dhaawac maskaxeed. Cudurka qoorgoyska waa dilaa iyadoo dunida 200,000 carruur ah ay wali u dhintaan qoorgoys sannad kasta

Ilmahaygu ma u dhiman karaa cudurka qoorgoys?

Daraasado ayaa tusya in 1,000 qof kasta ee qaada cudurka qoorgoyska, ilaa hal ilaa saddex ayaa u dhiman kara cudurka ama waxa uu sababo.

Nasiib-darro, laba dhallinyaro ah ayaa u dhintay cudurka qoorgoyska ee waddanka UK sannadihii la soo dhaafay. Mid 13 sano jir ah ee sannadkii 2006 iyo mid 17 sano jir ah sannadkii Juun 2008 – labadaba waxay qabeen dhibaatooyin dhinaca qaabka wax iska caabinta jirka ku timid maadaama aysan qaadan tallaalka MMR.

Qaadashada si fiican tallaalka ee guud ahaan dadwaynaha, markaa carruurta sida kuwan oo kale ee qaadi kara cudurka si fiican ayaa looga difaaci karaa cudurka qoorgoys, mumps iyo rubella.

Ilmahaygu khatar miyuu ku sugan yahay?

Cudurka qoorgoys waa cudurada faafa kuwa ugu daran ee la yaqaan. Qufac ama hindhiso ayaa fidin kara fayruska cudurka qoorgoys ilaa goob ballaaran. Maadaama uu aad u faafo cudurku, ilmahaagu wuxuu la kulmi karaa khatar waqti dheer ee qaaditaanka qoorgoys haddii aan lagaga difaacin tallaal ahaan. Sidaas darteed waa macquul in dhaqso ama gadaalba, ilmahaagu wuxuu qaadi karaa qoorgoys haddii aan laga difaacin.

Khatartu waxay aad ugu daran tahay carruurta aan qaadan tallaalka MMR. Carruurta qaadatay hal tallaal waxay u baahan yihiin tallaalka labaad si ay dhammaystaan dawada loona hubsado inay si buuxda u difaacan yihiin. Qaar carruurta ka mid ah ma qaadan karaan MMR sababtoo ah waxay leeyihiin xaalado wiiqaya qaabka difaacidda jirka, sida leukaemia. Carruurtan waxaa lagu difaaci karaa haddii carruur caafimaad qabta la tallaalo si looga hortago faafitaanka cudurka qoorgoyska.

Maxaan samaynayaa?

Qaabka ugu haboon uguna ammaansan ka hortagidda qoorgoyska waa in la xaqiijiyo in ilmahaaga si buuxda loogu tallaalay tallaalka MMR. Ilmahaaga waa in la tallaalaa waqtiyada da’da 13 bilood iyo mar labaad da’da saddex sano iyo afar bilood ama wax yar kaddib. Haddii ilmahaagu lumiyo lumiyo mid (ama labada) tallaaladan, waa inaad la xariirtaa Dhakhtarkaaga Guud (GP) si aad uga samaysato ballan tallaalid.

Waa muhiim in ilmahaagu dhammaysto si buuxda tallaalka MMR uuna qaato laba tallaal. Marna ma ahan wax laga daaho tallaalidda ilmahaaga.

Ma xasuusto in ilmahaygu qaatay tallaalka MMR iyo in kale

Eeg diiwaanka caafimaadka qofeed ee ilmahaaga (Buugga Cas - Red Book). Tani waxaa laga helayaa diiwaanka tallaalada uu ilmahaagu qabo. Haddii aadan wali hubin, la xariir Dhakhtarkaaga Guud (GP) adigoo waydiinaya taladooda.

Haddii aad ka shakisan tahay waxaa haboon inaad tallaasho. Tallaal dheeraad ah ma ku keenayo khatar dheeraad ah caafimaadka ilmahaaga haddii ay hore u qaateen mid ama labada tallaal ee MMR.

Ilmahaygu wuxuu qaatay hal tallaal ee qoorgoyska, mumps iyo rubella, ma inay wali qaataanbaa MMR?

Haa, markii aan ilmo laga tallaalin mid ka mid ah cuduradan, waxaan ku talinaynaa laba cabbir oo MMR ah. Haddii aanay waalidku hubin in carruurtooda si fiican looga difaacay hal tallaal, MMR wali waa la siin karaa. Waa ammaan in ilmahaaga la siiyo laba cabbir oo MMR ah xitaa haddii hal tallaal la siiyay. Waxaad tan kala hadli kartaa dhakhtarkaaga, booqdaha caafimaad ama kalkaaliyaha caafimaad.

Wali waxaan ka shakisanahay siinta ilmahayga saddex tallaal hal muditaan

Qaabka difaac jireed ee ilmo wuxuu u muuqdaa mid u samaysan ka jawaabidda noocyo kale duwan oo cudur ah laga bilaabo dhalashada ilaa wixii ka dambeeya. Ka jawaabidda tallaalada wuxuu qaabkani isticmaalayaa qayb yar oo ka mid ah awood qaab-dhismeedkan si uu uga jawaabo hawsha qaab difaaca jireed – xitaa ku cayaaridda sagxad nadiif ah way kaga hawl badan tahay qaab difaaca jireed marka loo eego tallaalada la isku daray sida MMR.

Inuu qaato ilmahaagu laba cabbir oo tallaalka MMR ah waxay ilmahaaga ka difaacaysaa saddexda cudur ee qoorgoys, mumps iyo rubella. Saddexdan cudur waxay saamayn daran ku yeelan karaan dadka dhallinyarada ah.

Ma leeyahay tallaalka MMR wax raad reeb ah?

Dhammaan tallaalada waxay keeni karaan raad reeb yar, sida xanuun goobta la duray. Saddexda fayrus ee MMR waxay ficil galaan waqtiyo kale duwan iyagoo soo saari kara raad reebyada soo socda kaddib cabbirka koowaad:

• lix ilaa kow iyo toban maalmood kaddib tallaalidda, qiyaastii hal ka mid ah tobankii carruur ahba wuxuu heli karaa qandho yar iyadoo qaarna ay heli karaan xanuun u-eg qoorgoys iyagoo ka go'a wax cunidda. Tani waxay dhacdaa markii qaybta tallaalka ee qoorgoyska ay bilowdo hawlgal, iyadoo caadiyan socota laba ilaa saddex maalmood;

• qiyaastii mid ka mid ah 1,000 carruur ee kasta oo la tallaalay wuxuu yeelan karaa xanuun ay sababtay qandho. Tan waxaa lagu magacaabaa 'jiidmid hilib – murqeed' ('febrile convulsion'), iyadoo ay raacayso qandho sabab kastaba, kaliya ma ahan tallaalka. Hase yeeshee , haddii ilmo aan la tallaalin uu ku dhaco qoorgoys, waxay qaadi karaan fursad ah shan jeer xanuun marka loo eego ilmaha la tallaalay;

• mararka qaar, carruurtu waxay heli karaan calaamado u-eg mumps (qandho iyo aruursamid jir) qiyaastii laba ilaa saddex usbuuc kaddib tallaalka maadaama qaybta tallaalka ee mumps ay hawl bilaabayso;

• marar aad u yar, carruurtu waxay heli karaan nabro yar-yar oo xanuun leh lixda usbuuc ee ka dambaysa tallaalka. Tani caadiyan iyadaa iska xallisanta, u qaad ilmahaaga dhakhtarka si loo soo eego. Isaga ama iyada ayaa kuu sheegaya sida loola tacaalo xanuunka; iyo

• wax ka yar hal ilmo ee halkii milyanba waxaa ku dhaca cudurka encephalitis (hurid/aruurid maskaxda) kaddib tallaalka iyadoo ay jirto caddayn aad u yar oo muujinaysa in runtii uu tallaalku sababo arrintan. Hase yeeshee, khatarka inuu ku dhaco cudurka encephalitis kaddib marka uu ku dhaco qoorgoys waa in u dhaxaysa hal ka mid ah 200 iyo hal ka mid ah 5,000.

Dhakhtarkaaga, kalkaaliyaha caafimaad ama booqde caafimaad ayaa kaala hadli karaya arrimahan si faahfaahsan.

Waa maxay fal-celinta kaddib tallaalka labaad ee MMR?

Fal-celimaha kor ku xusan oo kale ayaa dhici kara, laakiin waa si aad u yar fursadda ay ku dhici karaan.

Waxaan wali ka walwalsanahay in MMR ay keeni karto cudurka autism

Tallaalka MMR si caadi ah ayaa loo isticmaalaa iyadoo ammaan ah caalamka in ka badan 30 sannadood. In ka badan 500 milyan cabbir ayaa la siiyay carruurta in ka badan 100 waddan. Daraasaddii ugu horaysay ee muujisay xariirka gebi ahaanteedba wax kama jiraan ayaa laga dhigay. Cilmi baaris badan ayaa la sameeyay si loo baaro xariirka la sheegay iyadoo hadda ay jirto caddayn tiro badan oo muujinaysa in MMR aysan sababin cudurka autism. MMR waa ammaan sida tallaalada kale ee caadiga ah ee aan siino carruurteena si aan uga difaacno cuduro aad u daran.

Ilmahaygu wuxuu aleerjiik ku yahay ukunta – ma qaadan karaan tallaalka MMR?

Tallaalka MMR waxaa si ammaan ah loo siin karaa carruurta qabta aleerjiik aad u daran (falcelinta anaphylactic) ee ukunta. Haddii aad qabto wax cabasho ah, kala hadal kalkaaliyahaaga caafimaad, booqde caafimaad ama dhakhtarkaaga.

MMR waa qaabka ugu ammaansan ee aad kaga difaaci karto ilmahaaga cudurka qoorgoyska adigoo sidoo kale ka difaacaya cudurada mumps iyo rubella

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga, booqdahaaga caafimaad ama kalkaaliyaha caafimaad, ama wac **Lambarka Caafimaadka Tooska ah ee NHS Direct Wales ee 0845 46 47.**

Booqo: **www.mmrthefacts.nhs.uk iyo www.immunisation.nhs.uk** (macluumaad faahfaahsan ee tallaalka qoorgoys ku jira MMR.)

Macluumaad-sidahan waxaa laga helayaa bogga internet-ka ee tallaalka ee Golaha Xukuumadda Welsh:

http://new.wales.gov.uk/topics/health/protection/immunisation/leaflets/?lang=en

iyo luuqadaha hoose:

Arabic
Bengali
Bulgarian
Chinese
Czech
Farsi
French
Gujerati
Hindi
Kurdish (Sorani)
Lingala
Polish
Portugese
Punjabi
Russian
English
Spanish
Swahili
Tagalog
Urdu (Naskh)
Vietnamese

Nuqulo dheeraad ah ee macluumaad-sidahan waxaa laga helayaa Xarunta Daabacaadaha Golaha Xukuumadda Welsh (Welsh Assembly Government Publications Centre) iyadoo iimayl ahaan ah:

assembly-publications@wales.gsi.gov.uk

ama teleefoon ahaan 029 2082 3683 (inta u dhaxaysa 08.00 iyo 17.00 Isniin – Jimce)

Wixii ku saabsan macluumaad-sidahan waxaa lagu aadin karaa:

Health Protection Division
Welsh Assembly Government
Cathays Park
Cardiff
CF10 3NQ

Tel:
029 2082 5397 ama
029 2082 5410